



Waad ku mahadsantahay xulashadaada Minnesota Gastroenterology. Waxa jadwalka lagu galiyay in lagu sameeyo kolonoskobi.

Haddii aad sonkorow qabto, weydiiso dhakhtarkaaga caadiga ah arrimaha loogu talagalay xaddidyada cuntada iyo dawooyinka.

Haddii aad qaadata dawo khafiifisa dhiiggaaga (sida Coumadin®, Plavix® ama Lovenox®) oo aadan horayba ugala hadal arrintaas xafiiskayaga, fadlan nooga soo wac 612-871-1145.

Haddii aad asbiriin qaadata, sidaas waad ku sii wadan kartaa.

Haddaad uur leedahay ama loo maleynayo inaad uur leedahay fadlan halista iyo faa'iidooyinka hawlgankan kala hadal dhakhtarkaaga.

Waa inaad diyaarsataa qof baabuur kugu qaada oo mas'uul qaangaar ah maalinta baaritaankaaga. Fadlan xusuusnow in raacitaanka tagsi aysan ahayn baabuur raacitaan la dooran karo haddii uusan ku wehelin qof qaangaar mas'uul ah. Haddii aadan diyaarsan gaadiidka qof qaangaar ah oo mas'uul ah oo ku soo raaca, hawlgalka lagu qabanayo waa laga noqon doonaa dib ayaana ballan laguugu qaban.

Haddii aad u baahato inaad ka noqoto ballanta ama aad mar kale aad qabsato ballanta fadlan wac 612-871-1145 sida ugu dhakhsaha badan.

U DIYAARGAROWGA KOLONOSKOBIGA

Si loo hubiyo baritaan guul ku dambeeya, fadlan u raac si taxaddar leh dhammaan tilmaamaha. Ka gaabinta u diyaar garowga saxda ah ee dhammeystiran ee baaritaankaaga ayaa ku damabyn karta in loo baahdo hawlgal dheeraad oo labada hawlgalna waxa lagu soo dallici doonaa caymiskaaga.

Kahor baaritaankaaga:

Waxyaabahan soo socda ee aan u baahnayn warqad dhakhtar ka soo iibso farmasiyaha xaafaddaada:

- **2 kaniini oo Bisacodyl ah**, oo mid kastaa ka kooban yahay 5mg oo bisacodyl (calool jilciye Dulcolax® MA AHA saxaro jilciyaha Dulcolax®)
- **Dhalo 1-8.3 oz. ah budo Polyethylene Glycol 3350** (MiraLAX, SmoothLAX, ClearLAX or magac guud ahaan la mid ah)
- **64 oz. Gatorade® dareere ah** (AAN AHAYN guduud; AAN AHAYN budo). Gatorade® caadi ah, Gatorade G2®, Powerade® ama PoweradeZero® ayaa la oggol yahay.
- **1-10 oz oo ah dhalo ah Magnesium Citratte**(AAN AHAYN guduud)

7 maalmood kahor baaritaanka:

Jooji duf ama buushe kabitaan ah (fiber supplements) ama dawooyinka leh feerada (birta). Kuwan waxaa ka mid ah multi- fitamiinnada leh feerada, Metamucil® iyo Fibercon®.

3 Maalmood kahor baaritaanka

Jooji cunista dhammaan cuntooyinka dufkoodu ama buushahoodu sarreeyo oo bilow Cunto Dufkeddu Hooseeyo. Cuntada dufkeedu hooseeyo ayaa ka cawin karta nadiifintu inay noqoto mid wax ku ool ka sii badan leh. Tusaalooyinka Cuntada Dufkeedu Hooseeyo wax ka mid ah:



Cuntooyinka Lagu Talinayo:	Cuntooyinka laga Fogaanayo:
<p>Rooti, Siiriyal, Bariis Iyo Baasto:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Rootiga cad, rootiga duuduuban (rolls). buskudyada, croissant, melba toast - Waafalka, toostka Faransiiska, canjeerada - Bariis cad, nuudhulka, baastada, makarooni, bataato la diiray oo karsan - Karaakar (crackers) caadiga ah, Saltines - Siriyal la kariyay: farina, Kareemada Bariiska - Siriyal qabow: Puffed Rice, Rice Krispies, Corn Flakes, Special K 	<p>Rooti, Siriyal, Bariis Iyo Baasto:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Rootiyada ama rootiga duuduuban ee leh lawska, xabuubka ama furutka - Qamadikaamil ah, pumpnickel, rootiga rye-ga laga sameeyay, cornbread, rooti-galley (cornbread) - Bataatada diirka leh, bariiska midka kafeega leh ama bariiska duurka (wild rice), kasha (buckwheat)
<p>Khudaarta:</p> <ul style="list-style-type: none"> - khudaar jilicsan oo bilaa xabuub ah oo inta la kariyay la qasacadeey: daba-case ama kaarot, caaradaha asbaragaska, digirta cagaarka ah, bocor, isbiinish, digirta lima 	<p>Khudaarta:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Khudaarta qaydhiin ama la uumiyay - Khudaarta xabuubka leh - Sauerkraut - Winter squash, digir cagaaran, borokooli, Brussels sprouts, Kaabash, basal, kaalifilaawar, dikir duban, digir cagaaran, galley
<p>Furutada:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Casiir furut miiran - Furut qasacadaysan, marka laga reebo cananiska - Muuska bisil - Qare (xabxab) 	<p>Miraha:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Buruunka, casiirka buruunka - Miro qaydhiin ama engegan - Dhammaan midhaha, bardaha, timirta iyo sabiibka
<p>Caanaha/iyo waxa caanaha laga sameeyo:</p> <ul style="list-style-type: none"> -Caanaha, caadiga ah ma kuwa dhadhanka loo yeelay - Caano-fadhi, labaniyad, jalaato - Farmaajo, kootej jiis 	<p>Caanaha/iyo waxa caanaha laga sameeyo:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Caano-fadhi leh midho xabuub ama midhaha
<p>Hilibka, kalluunka, Digaagga, Digirta Engegan iyo Ukunta:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Hilib duqad ah oo si fiican loo kariyay, hilibka lo'ada, idaha, khansiirka, weylaha, doofaarka, kalluun, digaagga, iyo hilibaha xubin ah - Ukunta. - Subag laws aan lahayn xabuub laws 	<p>Hilibka, kalluunka, Digaagga, Digirta Engegan iyo Ukunta:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Hilib adag, tahar iyo carjaw leh - Digirta, digirta cagaaran, misirka engegan - Subag laws leh xabuub laws
<p>- Dufanka, Cunto fudud, Macmacaanka, Cuwaafta iyo Cabbitaannada:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Marjariinta, subagga, mayooneys, labeenta dhanaan, iidaanka saladhka - Maraqa caadiga ah - Sonkorta, jeliga saafiga ah, malabka, siirabka - Xawaashka, geedaha la kariyay, fuudka adag, fuudka, maraqa lagu daray khudaarta la oggol yahay - Bun, shaah, cabbitaannada soodha leh - Keegga/doolshaha caadiga ah, kukiyaada - Jelaatin, budhinka caadiga ah, labaniyadda, jalaato, sherbet, jelaatada qoriga - Nacnaca adag, pretzels 	<p>- Dufanka, Cunto Fudud, Macmacaanka, Xawaashyada iyo Cabbitaannada:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Lawsaska, xabuubka, qumbaha - Jaamka, malmalaaddada, midhaha keydsan - Bikils (pickles), saytuunka (olives), dabacase, horseradish - Macmacaanka leh midhaha, xabuubka, furutka engejisan, qumbaha, ama laga sameeyay badar kaamil ah ama buushe leh (bran) - Nacnaca laga sameeyay midhaha ama xabuubka - Saloolka

2 maalmood kahor baaritaanka

- Ku sii wad Cuntada Buusha Hoose leh.



- Ugu yaraan 8 galaas biyo ah cab maalinta oo idil.
- Qaboojiyaha ku rido Gatorade® ama Powerade®, haddii aad jeceshahay inaad qabowga ku cabto.
- Jooji cuntootinka adag **11:45 pm (habeen barka).**

1 maalin kahor baaritaanka

Bilow cunto dareere Saafi (Cadaan) ah

Tusaalooyinka Cuntooyinka Dareerayaasha Saafiga ah waxa ka mid ah:

• *Dareerayaasha guduudani (cas) waa maya; kafee waa maya; khamri waa maya; Wiixii caano ah ama ka sameysan waa maya*

- Ugu yaraan 8 koob biyo ah cab maalinta oo idil.
- Shaah (bilaa caano ama labeen/kiriim aan lahayn)
- Maraq ama fuud cad
- Gatorade®, Pedialyte® ama Powerade® (Aan guduud ahayn)
- cabbitaannada soodhaha leh iyo kuwa aan lahayn (Sprite®, 7-Up®, Ginger ale)
- Casiirka midhaha la miiray aan lahayn saxarka (tufaax, canabka cad, karaanberi cad)
- Jell-O®, jalaato qori, nacnaca adag (Aan guduuka ahayn)

12ka Duhurka: Qaado laba kiniin oo ah bisacodyl (Dulcolax®)

Inta u dhexeysa 4 iyo 6 galabtii:

- Isku dar 1 dhalo oo Miralax® ah iyo 64 oz. oo ah Gatorade® ah oo ku walaaq gudaha weel weyn.
- Cab 1 - 8 oz. galaas oo milanka Miralax®/Gatorade® ah.
- Ku sii wad cabbitaanka koob ah 1 - 8 oz. 15kii daqiiqadoodba markaa waxa ka dambeeya illaa isku darku aad dhammaneyso.

Maalinta baaritaankaaga:

- Waad qaadan kartaa dhammaan daawooyinkaaga subaxda .

4 saac kahor hawlgalka lagu qabanayo:

- Cab 10 oz. oo ah Magnesium Citrate ah.

3 saac kahor hawlgalka lagu qabanayo:

- **Jooji** cabbitaanka dareeraha saafiga ah.
- Ugu talagal wakhti dheeraad ah socdaalka aad ku tagaysid goobta hawlgalka laguugu qabanayo maadaama laga yaabo inaad joogsato oo aad musqul isticmaasho jidka markaad ku soo jirto.

Diyaar baad u tahay baaritaanka, haddii aad raacday dhamman tilmaamihii oo aysan saxaradaadu qaab lahayn, laakiinse ay tahay dareere saafi ah ama hurdi (jaalle) ah. Haddii aadan hubin inuu malawadkaagu nadiif yahay, fadlan xafiiskayaga ka soo wac 612-871-1145 kahor intaadan u soo dhaqaaqin ballantaada.

- Soo qaado liiska dhammaan dawooyinka hadda aad qaadato, kuna jiraan kuwa kasta oo loo qaato alerjiga iyo kuwa dukaammada laga iibsado bilaa warqad dhakhtar.
- Soo qaado aqoonsi sawir leh iyo waliba macluumaadka caymiska wakhtiga la socda sida kaar caymis caafimaad iyo foomamka u soo gudbinta ee laga yaabo inay u baahdaan shirkaddaada caymiska caafimaadka.

Tabaha Nadiifinta Mindhicirka

- Ku qabooji tallaajadda milanka Miralax®/Gatorade®. HA KU darin baraf milanka ama koobka cabbitaanka.
- Ku buuxi saacad ku xasuusaa 15kii daqiiqaba. Dhakhso u cab mid kasta oo ah galaaska 8 - oz. milanka si uu kaaga caawiyo nadiifinta mindhicirkaaga.
- Ku dhowow musqul! Waxaad yeelan shuban.
 - Xitaa haddii aad musqusha ku fadhido, ku sii wad inaad cabto milanka nadiifinta 15kii daqiiqaba.
 - Cab milanka dhammantiis illaa ay dhammaanayaan.
- Haddii aad dareento lallabo (yalaalugo) ama matag ku qabto, biyo ku luqluqo, oo ka naso 15 illaa 30 daqiiqo oo



markaana ku sii wad cabbitaanka milanka Miralax®/Gatorade®.

• Si fiican dareemi meysid illaa ay saxaradu ka dhaqmeysa mindhicirkaaga (illaa qiyaastii 2-4 saacadood ah). Qarqaryo inaad dareento ayaa laga yaabaa.

- Waxaad muudmuudsan kartaa nacinac adag (oo aan AHAYN kuwa guduudan)
- Masaxa ilmaha ee bilaa aalkolada ah ama Vaseline® ayaa laga yaabaa inay sahasho cuncunka maqaarka.
- Kiriimyada hydrocortisone ee bilaa warqad dhakhtara la iibsado, daaweynta babaasiirta ama Tucks ayaa la isticmaali karaa haddii loo baahdo.

SHARAXAADDA KOLONOSKOBIGA

Waa maxay kolonoskobi?

Kolonoskobi waa baaritaanka ugu saxsan ee lagu ogaado inay jiraan burooyinka mindhicirka iyo kansarka mindhicirka, oo waa baaritaanka kaliya ee burooyinka lagu saari karo. Muddada hawlgalkan, ayuu dhakhtar ku eegi doonaa midhicirkaaga ballaaran iyo maladwadka iyada oo la adeegsanayo tuubbo jilicsan oo loo yaqaan kolonoskob (colonoscope.). Kolonoskobka ayaa la galiyaa futada oo aayar lagu sii wadaa mindhirka. Haddii la helo burooyin ama waxyaabo kale oo aan caadi ahayn, dhakhtarka ayaa laga yaaba inuu ka gooyo meesha si loo soo baaro ama namuunad ahaan (bayoobsi) loo qaado.

Si loo helo natiijooyinka ugu fiican ee ugu saxda ah, waa in mindhicirkaagu si dhammeystiran nadiif u ahaadaa. Waxaad cabbi doontaa diyaarin gaar ah oo caloosha soo dhaqda si ay kaaga caawiso nadiifinta mindhicirkaaga. Waxa kale oo aad u baahan tahay inaad raacdo cunto gaar ah kahor dhowr maalmood kolonoskobiga ballanta laguugu qabtay. Xitaa haddii ay saxaradaadu saafi noqoto, waa muhiim inaad sida laguugu tilmaamay u qaadato dhammaan diyaarinta minidhicirka sababta oo jidhkaaga oo had iyo jeer sameeya dheecaan oo buraha yaryar ayaa ku qarsoomi kara dheecaankaas.

Maaxaa dhacaya marka la qaadayo kolonoskobiga?

U qorsheyso inay kaa qaadato illaa laba saac xarunta endoscopy maalinta kolonoskobiga lagaa qaadayo. Baaritaanka lafteeda ayaa qaata qiyaastii 20 illaa 40 daqiiqo in la dhammaystiro.

Kahor baaritaanka:

- Waxaad u beddelan doontaa marada cisbitaalka.
- Taariikhdaada caafimaad ayaa dib laguula eegi doonaa, oo lagu siin doonaa foom oggolaansho oo aad saxeexo.
- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku galin doona faleebo (IV) gacantaada ama cududda.

Muddada baaritaanka lagu jiro:

- Dawo ayaa lagaa siin doonaa faleebo (IV) si ay kaaga caawiso inaad nasato oo aad lulmo dareento.
- Tirada garaaca wadnaahaga iyo heerarka oksijiinta ayaa lala socon doonaa. Haddii cadaadiska dhiiggaagu hooseeyo waxa dareere lagaa siin doona khad faleebo (IV).
- Dhakhtarka ayaa galin doonaa tuubbo jilicsan oo dhexda bannaan oo loo yaqaan colonoscope dabadaada oo waxa lagu sii wadi doona malawadka iyo mindhirka iyada oo lagaa fiirinayo cad ama burooyin aan caadi ahayn.
- Inta lagu jiro hawlgalka, waxa laga yaabaa inaad dareento majeerid. Taasi waa caadi.
- Haddii cad am burooyin aan caadi ahayn la helo, dhakhtarka ayaa laga yaabaa inuu ku gooyo colonoscope si loogu sameeyo fiin soke ama bayobsi (biopsy) loogu sameeyo. Cad ka goyntu waa bilaa xanuun.

Maxaa dhacaya kadib baaritaanka?

- Dhakhtarka ayaa kaala hadli doona adiga arrimaha ku saabsan natiijooyinka hore ee baaritaankaaga.
- Dhakhtarka ayaa u diyaarin doona warbixin buuxda dhakhtarka kuu soo diray kolonoskobiga.
- Waxa laga yaabaa inaad yeelato woxoogaa caloolmajeer ama dibiro kadib hawlgalka. Taasi waa caadi oo waxay si degdega u joogsan marka la dhuuso.
- Daawooyinka la bixiyo marka baaritaanka lagu jiro ayaa kaa mamnuucaya inaad kaxayso baabuur maalinta inta ka dhiman.
- Kadib baaritaanka, waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga ah. Ka fogow khamriga illaa maalinta xigta.
- Waxa lagugu waaninayaa inaad ka fogaato safarka diyaaradaha illaa 24-kasaac ee ka dambeeya hawlgalka.



- Waxaad dib u bilaabi waxqabayadaadii caadiga ahaa maalinta ka dambeysa hawlgalka.
- ut1} • Kalkaaliye ayaa ku siin doona tilmaamaha ka sii-deynta meesha kahor intaanad ka tagin xarunta endoscopy-iga. Hubi inaad weydiiso kalkaaliyaha fariimaha khaaska ah haddii aad qaadato khafiifiyeyaal dhiig sida asbiriin, Coumadin ama Plavix.
- Wixii cad ee muunad ah ee burooyin ah ee la gooyo marka lagu baarayo ayaa loo diri doonaa sheybaadh si loo qiimeeyo. Waxay qaadan doontaa 5-7 maalmood shaqo in adiga lagugu wargaliyo natiijooyinka.

Miyay suurtagal tahay inay dhibaatooyin ka yimaaddiin kolonoskobiga?

In kasta oo arrimaha oo murgamaa ama sii xumaada aad dhif u tahay, hawlgal caafimaad oo kasta ayaa yeelan kara halis. Kalkaaliye caafimaad ayaa adiga kaala hadli doonta halista suurtagalka ah ee calaamadaha digniinta ah kahor intaadan ka tagin xarunta endoscopy.

Halisaha waxa ka mid ah:

- Dalloshanka, ama dilaaca gidaarka mindhicirka
- Dhiigitaanka goobta cadka laga hooyay
- Dareen ka celinta dawooyinka.

Natiijooyinka baaritaan kasta ayaa lagu soo diri doonaa boostada.



Habdhaqanka Lacageed ee MNGI

Guudmarka Habdhaqanka

Bixinta oo dhammaystiran ayaa la filayaa marka laga helo tafaasiisha Minnesota Gastroenterology, P.A. (MNGI) iyo Xarumaheeda Qalliinka Bukaana-Socodka (ASCs). Haddii uusan bixin karin lacagta oo idil, bukaanka ayaa xil ka saaran yahay inuu la soo xiriiro Xafiiska Ganacsiga MNGI si loo dejiyo qorshe lacag bixin iyo si looga wada hadlo wixii ah gargaar lacageed ee la heli karo. Biilka oo aan la bixin iyo/ama u hoggaansanaan la'aanta qorshaha la dejiyay ayaa dhici karta inay ku dambeyso iyada oo koontada ama xisaabta loo gudbiyo wakaalad lacag ururineed. Markay koonto ay leedahay baaqiyo badan oo aan la bixin iyo/ama loo diray hay'ad lacag ururineed, bukaanka ayaan ballamo jadwalka ka gashan karin MNGI iyo qaybaheeda ASC illaa baaqiga oo buuxa la bixiyo.

Habka Caymiska iyo Biil Ku Dallaca

Waa xilkaaga inaad ka xaqiijiso dheeftaada caymiskaaga qorshahaaga (yaasha) caymis kahor intaadan rugta caafimaad booqan ama hawlgal caafimaad lagu samayn. Haddii qorshahaaga (yaasha) caymis u baahn yihiin lacag la bixin (co-payment) ballantaada, lacag la bixinta yaa la rabaa marka la yimaad ballanta. Si loo hubiyo ku dallac sax ah, adiga waxa lagu weydiin doonaa inaad bixiso macluumaadka caymiska hadda aad leedahay iyo aqoonsi sawir leh mar kasta oo ballanta aad u timaad xafiisyadayada mid ka mid ah. Markaad dhiibi weydo kaarkaaga hadda aad leedahay ayaa waxay markaa ka sii deyn doonta xil kasta oo ka saaran MNGI wixii khalad ah ama xereynta wakhtigeeda ka dhacda ee sheegashooyinka la qandaraastay. Fadlan ogeysii shaqaalahayga xafiiska wixii isbeddel ah ee ku yimaad macluumaadka caymis ama shaqsi.

Oggolaanshaha Hore iyo Sharciyeynta Hore

Haddii qorshaha (yaasha) caymiskaagu u baahan yahay (yihiin) oggolaansho hore ama sharciyeyn hore adiga ayaa mas'uul ka ah u soo wacista Xafiiskayga Ganacsiga taleefanka (612) 871-1145, xulka 5 kahor ballantaada. Shaqaalahayga ayaa kaa caawin kara sidii aad u heli lahayd oggolaanshaha booqashadaada ama hawlgalka.

U diritaanno

Haddii qorshahaaga (yaashaada) caymis u baahan yahay (yihiin) u diritaan adiga ayaa mas'uul ka ah ka helitaanka u diritaankan daryeel bixyahaaga hore ama rugta caafimaadka kahor ballantaada.

Gudbinta Sheegashooyinka

Haddii aad na siisay macluumaad caymis, waxaan u gudbin doona sheegashada qorshahaaga (yaashaada) caafimaad oo aan kuu caawin doonaa si kasta oo macquul ah oo aan karno sidii aan u fududeyn lahayn helitaanka lacagta lagu sheeganayo. Hase yeeshe, qorshahaaga (yaashaada) caafimaad ayaa laga yaabaa inay kaaga baahdaan inaad u siiso macluumaadka qaarkood si toos ah waana xilkaaga inaad u hoggaansanto weydiisigan.

Ku Dallaacadda

Markay sheegashooyinkaaga caymis ay shaqeeyaan qorshahaaga (yaashaada) caymis tafaasiil ayaa lagaaga soo diri doonaa wixii ka goyn ah, wada bixiin (co-payment) ama baaqiga ayna bixinin qorshahaaga (yaashaada) caymis. Haddii jadwalka lagu galiyo hawlgalka, waxaad heli doontaa in ka badan hal biil. Hal bayaan kharash (ka socota MNGI) ayaa noqon doonta ujuurada ama fiiga dhakhtarka ee ballanta; mid labaad, oo bayaan gooni ah (kana socota isbitaalka ama ASC oo ah meesha hawlgalka lagu qabtay) ayaa noqon doonta ujuurada goobta. Waxa kale oo waliba aad ka heli biilal gaar ah baaraha cudurrada (Hospital Pathology Associates) haddii bayobsiga (biopsy) sambalka burada ama cadka loo baahnaa iyo/ama biil aad ka hesho sheybaarka (LabCorp ama Prometheus) haddii baaritaan dhiig la qabtay.

Lacag Bixinta

Lacag bixinta oo buuxda ayaa la iska rabaa markaad hesho tafaasiisha lacagta. Waxaan ku aqbalnaa bixinta kharashka kaarka deynta (Visa, MasterCard iyo Discover), jeeg shaqsiyeed ama money order. Bixinta elektiroonigga ah ayaa lagu samayn karaa internetka bartan www.mngastro.com. Haddii aadan bixin karin lacagta baaqiga ah oo buuxda, waa mas'uuliyaddaada inaad la soo xiriirto Xafiiskayga Ganacsiga si aad u dejiso qorshe bixin ay labada dhincaba ku heshiyaan, oo bilaa dul-saar ah sida ugu dhakhsaha badan iyo sidii looga wada hadli lahaa ilo lacageed kale oo laga yaabo in la heli karo.

Gargaarka lacageed

Bixinta daryeel heer sare ah ayaa annaga noo ah muhiim, iyada oo aan loo eegin heerka lacageed ee qofka. MNGI ayaa leh xulasho gargaar la heli karo si loo waafajiyo xaaladaha kala duwan ee dhaqaale. Haddii uusan dakhligaagu ku filnayn inuu dabbaro kharashyada daryeelka caafimaadkaaga oo aadan awoodin inaad la dejiso Xafiiskayga Ganacsiga qorshe bixin labada dhincaba ku heshiyaan waxa laga yaabaa inaad u qalanto ka dhimis loo maro Barnaamijka Caawimada Lacageed ee MNGI. Fadlan kala soo xiriir Xafiiskayga Ganacsiga taleefanka (612) 871-1145, xulo 5 si aad u hesho macluumaadka ku saabsan Barnaamijka Gargaarka Lacageed ee MNGI, ka dhimista qiimaha dadka buka ee aan lahayn caymiska, iyo barnaamijyada gargaarka lacageed ee dibadda ah ee laga yaabo in la heli karo.

Goobtayadu waxay u heellan tahay sidii ay daweynta ugu fiican u siin lahayd bukaankayaga. Qiimayaashayadu ama sicirkayagu ayaa ka mid ah kuwa caadiga ah iyo kuwa loo bartay ee ah ku dallacaadyada aagayaga iyo adeegyada la bixiyo.

Waad ku mahadsantahay xulashadaada MNGI iyo fahamkaaga iyo u hoggaansanaantaada habdhaqanka lacageed. Haddii aad wax

*su'aalo ama welwel ah ka qabto habdhaqankan, fadlan kala xiriir Xafiiskayaga
Ganacsiga taleefanka (612) 871-1145, xuladka 5.*



MNGI Endoscopy ASC, Inc.
East Metro Endoscopy Center, LLC
Premier Gastroenterology Care



Minnesota Gastroenterology, P.A. Xeerka Xuquuqda Bukaanka

Adiga oo ka mid ah bukaanada Waaxda Xanuunada Caloosha ee Minnesota, P.A. ayaa waxaa uu qorshe hawleedkani kuu surtogalinaya adiga, bukaan ahaan, in aad xaq u lahaatid:

Xeerka Xuquuqda Bukaanka Xarunta Qalliinka Bukaanku-Socodka Minnesota Xeerdejinta Minnesota 2004

144.651 Bukaanka iyo deggenayaasha goobaha daryeelka caafimaadka; xeerka xuquuqda.

Qodabka 1. **Ulajeeddada xeerdejinta** Waa ulajeeddada sharciyeed iyo ujeeddada qaybtan sidii loo hormarin lahaa danaha iyo fayoobida bukaanada iyo kuwa ku nool xarumaha daryeelka caafimaadka. Goob daryeel caafimaadna ugama baahan doonto qof bukaan ah inay ka tanaasulaan xuquuqdan iyada oo shuruud looga dhigo u oggolaanshaha goobta. Mas'uul kasta ama ilaaliye bukaan ama qofka ku nool ama, hadduu maqan yahay mas'uul ama ilaaliye, qof daneeya, ayaa weydiisan kara in la dhaqan geliyo xuquuqahan isaga/iyada oo ku hadlaya magaca bukaanka ama qofka degganaha ah. Sidoo kale qofka daneeya waxaa kale oo u weydiisan karaa in la dhaqan geliyo xuquuqahan isaga/iyada oo ku hadlaya magaca bukaanka ama qofka degganaha ah ee leh mas'uul ama ilaaliye daryeelka ayada oo loo marayo hay'adaha maamulitaan ama maxkamadda degmada ay hoos yimaaddiin ka mas'uul ahaanta iyo ilaalintuba. Iyada oo la sugayo natiijada qaabsocodka dhaqangalinta ayaa waxaa laga yaaba in xarunta caafimaadku, si niyad-sami leh, ay u adeecdo tilmaam bixinta mas'uulka ama ilaaliyaha. Waa ulajeeddada qaybtan in bukaan kasta xoriyadahiisa diineed iyo madani, oo ay ku jirto xuquuqda go'aannada shaqsiyeed ee madax-bannaan iyo ogaanshaha waxyaabaha la kala dooran karo ee la heli karo, aan lagu xadgudbi karin, goobtuna waa in ay dhiiri-galisaa oo ay taageertaa in sida buuxda ee suurtagalka ah xuquuqahaas loo isticmaalo.

Qeexitaanka

Qodob 2. **Qeexitaanno.** Ulajeeddoyinka qodobbada 4 illaa 9, 12, 13, 15, 16, iyo 18 illaa 20, "bukaan" waliba waxay la micno tahay qofka adeeg daryeel caafimaad ka helaya xarunta qalliinka bukaan-socodka.

Qodob 4. **Macluumaad ku saabsan xuquuqaha.** Bukaanku ayaa marka loo oggolaanayo, loo sheegi doonaa in ay jiraan xuquuqyo sharci oo loogu talagalay in lagu ilaaliyo inta ay xarunta joogaan ama inta ay daweyntu uga socota iyo inta jaaliyadda lagu daryeelaayo waxana kuwan lagu qeexay bayaanka qoran ee la socda ee xuquuqaha iyo mas'uuliyadaha la dabiqi karo ee lagu soo bandhigay qaybtan. U waafajin macquul ah ayaa loo samayn doonaa kuwa qaba wax u dhinnaanta wada hadalka iyo kuwa ku hadla luqad aan ahayn Ingiriisi. Ujeeddeeyinka hadda u yaal goobta, waxyaabaha ka soo baxa baaritaanada maamulka caafimaadka gobolka iyo tan degmada, iyo faahfaahin dheeraad ah ee bayaanka qoran ee xuquuqaha waa in ay heli karaan bukaanada, mas'uuliyiintooda ama wakiiladooda ka dib marka ay ka soo dalbadaan macquul ahaan maamulaha ama shaqaalaha kale ee u xilsaaran, iyada oo la raacayo cutubka 13, Xeerka Dhaqanka Xogta, iyo qaybta **626.557** ee la xidhiidha dadka qaangaarka ah ee jilicsan.

Qodob 5. **Ula-dhaqanka qaddarinta leh** Bukaanku ayaa xaq u leh in shaqaalaha ama shaqsiyaadka adeegga ka bixinaya daryeelka caafimaadka goobta ula dhaqmaan shaqsiyadooda si qaddarin iyo ixtiraam leh.

Qodob 6. **Daryeelka caafimaad ee habboon.** Bukaanku ayaa u lahaan doona xaq daryeel caafimaad iyo shaqsi oo ku habboon oo ku saleysan baahida shaqsiyeed.

Qodob 7. **Aqoonsiga Dhakhtarka.** Dadka bukaan ah ayaa ku heli doona ama lagu siin doona, qoraal ahaan, magaca, cinwaanka meheradda, lambarka taleefanka, iyo takhasuska, haddii uu jiro, ee Dhakhtarka mas'uulka ka ah isuduwidada daryeelkooda. Mararka ay dhacdo inay caafimaad-ahaan aan lagula talinayn, sida uu dhakhtarka xaadirka ah ku caddeeyey warqadda lagu diiwaangeliyo, macluumaadka ayaa la siin doonaa mas'uulka bukaan socodka ama qofka kale ee uu u idmaday bukaanu wakiil ahaan.

Qodob 8. **Xidhiidhka lala yeelanayo adeegyada kale ee caafimaadka.** Bukaanka adeegyo ka hela bixiye dibadda ah ayaa xaq u leh, markay weydiistaan, in loo sheego aqoonsiga bixiyaha. Macluumaadka ayaa lahaan doona magaca bixiyaha dibadda ah, cinwaanka, iyo sifooyinka adeegga laga yaabo in loo fidiyo. Mararka ay dhacdo inay caafimaad-ahaan aan lagula talinayn, sida uu dhakhtarka xaadirka ah ku caddeeyey warqadda lagu diiwaangeliyo, macluumaadka ayaa la siin doonaa mas'uulka bukaan socodka ama qofka kale ee uu u idmaday bukaanu wakiil ahaan.

Qodob 9. **Macluumaadka ku saabsan daweynta.** Bukaanka ayuu dhakhtarkoodu siin doona macluumaadkooda dhan ee markaa la joogo kuna saabsan ogaanshaha nooca cudur, daaweynta, waxyaabaha lagu baddeli karo, halista ka iman karta, iyo saadaaliska dhaqtarku uu ka bixiyo ee waajibaadka sharci ee takhtarka uga baahan yahay in uu gudbiyo.



Macluumaadkan waa in uu ku qornaadaa qoraal iyo luqad bukaannadu si suurtoagal ah looga fisho in ay fahmi karaan. Bukaanka waxa wehelin kara xubin ka mid ah qoyskooda ama wakiil ay doorteen oo kale. Macluumaadkan waxa ku jiri suurtoogalka ay ugu badan tahay ee caafimaad iyo cilmi-nafsi ee daaweynta dhici karta iyo waxyaabaha loogu beddeli karo. Mararka ay dhacdo inay caafimaad-ahaan aan lagu talinayn, sida uu dhakhtarka xaadirka ah ku caddeeyey warqadda lagu diiwaangeliyo, macluumaadka ayaa la siin doonaa mas'uulka bukaanka ama qofka kale ee uu u idmaday bukaanku ma degganuhu wakiil ahaan. Shaqsiyaadka waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan macluumaadkan. Bukaanka kasta ee leh xanuun nooc kasta oo kansarka naaska waa in si buuxda loogu wargeliyaa, ka hor ama goorta oggolaanshaha iyo inta ay ku jirto, dhammaan hannaanada kale ee taabagalka ah ee daaweynta ee takhtarka daaweynaya u leeyahay aqoon, oo ay ku jirto, qalliin, raajo, ama daaweynta kemotharabiyuutika ama daaweyno isku jira iyo qatarta la socota kii kasta ee hannaankan.

Qodob 12. Xuquuqda daryeelka lagu diidi karo. bukaanka kartida aqoon u leh waa in ay xaq u lahaadaan in ay diidaan daaweynta ayagoo ku saleynaya macluumaadka loogu baahan yahay Qeyb-hoosaadka 9. Tusaale ahaan haddii bukaanku uusan karin inuu fahmo marxaladaha laakiinse aanan lagu xukmin in uu yahay qof karti aan lahayn, ama goorta waxyaabaha sharcigu uga baahan yahay ay xadidayso xuquuqda uu ku diidi karo daaweynta, xaaladdaha iyo marxalamaddaha waa in si buuxda takhtarka daaweynaya ku qoro diiwanka bukaan socodka.

Qodob 13. Cilmi-baarista tijaabada ah. Ogolaansho qoraal oo lagu wargeliyey waa in la helaa ka hor inta aan bukaan socodka uusan ka qeyb qaadan Cilmi-baarinta tijaabada. Bukaanka waxay xaq u leeyihiin in ay diidaan in ay ka qeyb qaataan. Ogolaanshaha iyo diidmadaba waa in lagu qoro diiwanka daryeelka shaqsiga.

Qodob 15. Asturnaanta daweynta Bukaanka waa in ay xaq u lahaadaan tixgelin iyo asturnaan taas oo la xiriirta barnaamijkooda daryeel shaqsi iyo caafimaadkooda. Wada-hadalka kayskooda, la tashi, baaritaan, iyo daaweynta waa mid qarsoon oo waa in loo howlgeliyaa si dahsoon. Asturnaanta waa in la tixgeliyaa inta lagu jiro musqusha, qubeyska, iyo inta lagu howl jiro is nadiifinta shaqsi, aan ka ahayn marka looga baahan yahay amaanka iyo taageerida bukaan socodka.

Qodob 16. Qorsoodnimada Diwaaanka Dadka bukaanka ah ayaa loo hubin doona diiwaangalintooda caafimaad iyo shaqsi ahaaneed in la dhowrayo, waxana ay ogolaan karaan ama diidi karaan in loo gudbiyo shaqsiyaad kale ee kasta oo xarun kale ka socoda. Nuqullada xogta macluumaadka qoran ee diiwaanka ayaa laga dhigi kuwo la helo iyada oo la raacayo qodobkan iyo qaybtan **144.293**. Xaqan ayaan khusayn baadhitaanka cabashada iyo u fiirsiga Waaxda Caafimaadka, marka looga baahan yahay qandaarsyo bixinta qolo saddexaad, ama marka kale ee u sharicigu bixiyo

Qodob 18. Adeeg u jawaabis leh Bukaanka ayaa xaq u leh inay u helaan jawaab degdeg ah oo macquul ah su'aalhooda iyo codisyadooda.

Qodob 19. Asturnaanta shaqsiyeed Bukaanka ayaa xaq u leh qaddarin kasta oo ah ku saabsan asturnaantooda, shaqsi ahaantooda, iyo dhaqan ahaantooda markay la xiriirto fayoo bidooda bulsheed, diineed iyo cilmi-nafsi. Shaqaalaha goobta ayaa qaddarin doona asturnaanta qolka deggdenaha iyaga oo albaabka garaaca oo ka raadsada oggolaansho kahor inteyna soo galin, marka laga reebo markay tahay xaalad degdeg ah ama marka ay iska caddahay inaan lagu talinayn.

Qodob 20. Cabashooyinka. bukaanka waa in lagu dhiiri geliyaa oo lagu taageeraa, inta ay sii joogaan xarunta ama inta la daaweynaayo, in ay fahmaan oo ay isticmaalaan xuquuqdooda bukaan socod ama muwaadin ahaan. Bukaanka way ka hadli karaan cabashooyinkooda oo shaqaalaha xarunta iyo dad kale ee ay doorteen ayay u soo jeedin karaan in wax laga badelo sharciyada iyo adeegyada xarunta, xannibaad, fara-lagal, jajuub, takoor, ama aarsasho la'aan oo ay ku jirto cabsi gelin in laga saaro xarunta. Digniinta hanaanka cabashada xarunta ama barnaamijka, iyo sidoo kale cinwaanada iyo talefoon lambarada Xafiiska Cabashada ee Xarunta Caafimaadka iyo qofka cabashadaha ka xaliya guriga dadka waaweyn lagu xanaaneeyo ee aaga ayadoo la hiigsanaayo Older Americans Act, Qeyb-hoosaadka 307(a)(12) waa in lagu dhejiyaa goob muuqata.

U hogaansanaanta laga rabo xarumaha qaliinka bukaan-socodka ee ku saabsan qeyb-hoosaadka **144.691** iyo u hogaansanaanta laga rabo ururada daryeelista caafimaadka ee ku saabsan qeyb-hoosaadka 62D.11 waxaa laga soo qaaday inay tahay u hogaansanaan shuruudda hanaanka cabashada guddaha oo qoraal ah.

MNGI Endoscopy ASC, Inc. iyo East Metro Endoscopy Center, LLC waxa sharciyeeyay Xarumaha Medicare iyo Adeegyada Medicaid. Xuquuqda bukaanka ee dheeraadka ah ee Xarunta Qalliinka Bukaan-socodka ayaa ku liis gareysan hoosta.

§ 416.50 Shuruudda Hoos Imaadka – Xuquuqda Bukaanka



Asc waa inay ku wargalisaa bukaanka ama wakiilka bukaanka xuquuqda bukaanka , oo waa inay ilaaliyaan oo ay horumariyaan ku dhaqanka xuquuqdaas.

Tilmaamo Ka Tarjumid §416.50

§ 416.50(a) (1) Halbeeg: Ogeysiiska Xuquuqda

(1) ASC waa inay siisaa bukaanka ama wakiilka bukaanka ogeysiis hadal ah oo ku saabsan xuquuqda bukaanka iyada oo ka horreysa taariikhda hawlgalka, oo ah luqad ahaan iyo hab uu bukaanku ama wakiilka bukaanku fahmayaan.

§ 416.50(a) Halbeeg: Ogeysiiska Xuquuqda

(1)[...] **Intaa waxa u dheer, ASC waa inay –**

Ogeysiiska xuquuqda qoraal ahaan lagu dhajiyo goobta ama goobaha ASC dhexdeeda ee ay u badan tahay inay bukaanka (ama dadka ka wakiilka ah, haddii ay khuseyso) sugaya daaweyntu arkaan. Ogeysiiska ASC ee xaqa waa inuu lahaaadaa magaca, cinwaanka iyo taleefan lambarka wakiilka ka tirsan hay'adda Gobolka ee bukaanku uga warbixin karaan cabashooyinka, iyo waliba barta internetka ee loogu talagalay Garsooraha (Ombudsman) Qaataha Medicare.

§ 416.50(a) (3) Halbeeg: Dhiibitaanka iyo baaritaanka cabashada

(ii) Dhammaan xadgudubyada/cabashooyinka la sheeganayo ee la xiriira, laakiin aan ku xaddidnayn , si xun ula dhaqanka, daayacaadda, hadal ahaan, maskax ahaan, galmo ahaan ama tacaddi jidhka ah waa in si buuxda loo diiwaangaliyaa.

(iii) Dhammaan eedeeynta waa in isla markaaba looga warbixiyaa qofka mas'uuliyadda ka haya ASC.

(iv) Kaliya eedeeynta la xaqiijiyay waa in looga warbixiyaa Xafiiska Gobalka ama xafiiska degmada ama labadaba.

§ 416.50(b) Halbeeg: Ku dhaqanka xuquuqda iyo qaddarinta maalka iyo qofka

(4) Haddii u bukaan uu xukun maxkamadeed ku xukumo inuu yahay qof aan dhannayn iyada oo la fiirinayo sharciyada gobolka ee caafimaadka iyo badbaadada, xuquuqda bukaannada waxaa oofin doona qofka loogu dooraty sharciga Gobolka ee u wakiil ahaanta qofka bukaanka ah.

(5) Haddii maxkamad Gobol aysan bukaanka ku xukumin inuu yahay qof aan dhannayn, wakiil sharci kasta oo oo uu idmaday bukaanku iyada oo la raacayo sharciga Gobolka ayaa u fulin kara xuquuda bukaanka illa xadka uu oggol yahay sharciga Gobolka.

§ 416.50(c) Halbeeg: Asturnaanta iyo Ammaanka

Bukaanku waxaa uu xaq u leeyahay–

(2) inuu ku helo daryeelka goob badbaado leh.

§ 416.50(c) Halbeeg: Asturnaanta iyo Ammaanka

Bukaanku waxaa uu xaq u leeyahay–

(3) Inuu xor ka ahaado dhammaan qaabab kasta oo tacaddi ama dhibaataayn ah.

HADDII AAD CABASHO KA QABTO HAYADDA AMA SHAQSIYAADKA KU SIIYA ADEEGYADA QALNIINKA BUKAAN SOCODKA, WAXAAD SOO WACI KARTAA, U SOO QORI KARTAA, AMA AAD SOO BOOQAN KARTAA XAFIISKA CABASHOYINKA XARUNTA CAAFIMAADKA, WAAXDA DHAGEYSIGA CAAFIMAADKA EE MINNESOTA. WAXA KALE OO AAD LA XIRIIRI KARTAA GARSOORAHA (OMBUDSMAN) DADKA WAAYEELKA AH REER MINNESOTA.

{Xafiiska Cabashooyinka Goobta Caafimaadka

(651) 201-4201
 1-800- 369-7994
 Faakis: (651) 281-9796

Garsooraha (Ombudsman) daryeelka muddada dheer

(651) 431-2555
 1-800-657-3591
 Faakis: (651) 431-7452
www.mnaging.org

Cinwaanka Boostada:

[1]Ombudsman for Long-Term Care
 PO Box 64971
 St. Paul, MN 55164-0971

Cinwaanka Boostada:

Minnesota Department of Health
 Office of Health Facility Complaints
 85 East Seventh Place, Suite 300
 P.O. Box 64970
 St. Paul, Minnesota 55164-0970
www.dhs.mn.us

Medicare Beneficiary Ombudsman

1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)
www.cms.gov/center/ombudsman.asp



Qirashada Helitaanka Ogeysiiska Dhaqannada Asturnaanta

Xeerka Wareejisadka iyo Xisaabtanka Caymiska Caafimaadka (HIPAA) ayaa fursad kuu siineysa xuquuqaha qaarokood ee ku saabsan isticmaalka iyo bixinta macluumaadkaaga caafimaad ee dhowrsan. Ogeysiiskayaga Dhaqannada Asturnaanta ayaa si faahfaahsan u sharaxaya xuquuqdan. Minnesota Gastroenterology, P.A. iyo Xarumaha Endoscopy ee bahdeeda ku jira ayaa xaq u leh inay dib ugu noqdaan Ogeysiiska Dhaqannada Asturnaanta wakhti kasta. Waxa lagu siin doonaa nuqulka Ogeysiiska dib loogu noqday markaad weydiisato.

Fasaxa Sii-deynta macluumaadka/ Taleefanka Xiriirka

Marka aad buuxisid qaybtan foomka oggolaanshaha, adiga ayaa fasax u siinaya Minnesota Gastroenterology, P.A. iyo Xarumaha Endoscopy ee bahdeeda ku jira inay kuugu dhaafaan jadwalkaaga, macluumaadka caafimaad iyo biil lagugu soo dallaco qofka (dadka) aad tilmaamtay iyo/ama mashiinka farriinta/lambarka taleefanka farrinta codka ee aad bixisay.

Ogeysiinta Cilmi-baadhista:

Minnesota Gastroenterology, P.A. ayaa leh barnaamij cilmi-baadhis oo firfircoon. Dhammaan cilmi-baadhista bukaanka ee laga hawlgaliyo Minnesota Gastroenterology ayaa marta hab gaar ah oo u amrayo sharcigu oo dib u eega oo ilaaliya bukaanka ku dhex jira cilmi-baadhista waxana ku jirto asturnaanta. Shaqaalahayaga cilmi-baarista caafimaad ayaa laga yaabaa in xilliyada qaarkood ay eegi doonaan diiwaanka caafimaadka si ay dib ugu noqdaan daryeelkaaga iyo taariikhda caafimaad si marin loogu helo u-qalmiitaankaaga ka qaybgalka cilmi-baarista tijaabada ah ee suurtagalka ah inay waxtar u yeelato daweynta xaaladdaada caafimaad. Uma isticmaali doono macaluumaadkaaga caafimaad ama daah uga qaadi meyno cid ka baxsan Minnesota Gastroenterology iyo /ama shuraako ganacsi oo ay leedahay Minnesota Gastroenterology iyada oo aan marka hore adiga lagaa helin fasax ama la ogaan inay xogtaadu dhowrsan tahay. Ka qaybqaadashada cilmi-baadhistu waa ikhtiyaar. Fasax oggolaansho oo warqabis leh oo la saxee xay ayaa loo baahan yahay kahor ka qaybgalka bukaanka cilmi-baaris kasta.

Ogeysiinta Biilasha Badan:

Haddii aad hawlgal caafimaad aad ku leedahay mid ka mid ah xarumahayaga qalliinka bukaan-socodka waxaad heli doontaa LABA iyo suurtagal ahaan illaa afar bayaan kharash oo kala duwan oo ku saabsan hawlgalkaaga caafimaad

- Mid ka mid ah bayaanada kharashka waxay ka iman doontaa Minnesota Gastroenterology, P.A. Biilkani wuxuu ka soo jeedaa adeegyada xirfadle ee adiga lagu siiyay. Tani waa ujrada xirfadle ee loogu talagalay dhakhtarka fulinaya hawlgalka. Xafiiskayaga ayaa kharashyadan ku dallaci doona shirkaddaada caymis. Fadlan ku talagal sidii aad u bixin lahayd qayb kasta oo aan hoos iman shirkaddaada caymis isla marka aad hesho bayaanka kharashka ee ugu horreysa.
- Tafaasiisha kale ee kharashka ayaa ka iman doonta midkood kuwa soo socda: East Metro Endoscopy Center LLC, iyo MNGI Endoscopy ASC, Inc. Biilkan ayaa ka soo jeeda ujrada ama fiiga goobta waxana uu beddelkeeda galayaa biilka Isbitaalka bukaan-socodka. Xarumahayaga Qalliinka Bukaan-Socodka ayaa ah kuwo ay sharciyeysay gobolku oo Medicare aqoonsan tahay. Shirkaddaada caymis ayaa si gooni ah loogu dallici doonaa kharashyadan. Fadlan ku talagal sidii aad u bixin lahayd qayb kasta oo aan hoos iman shirkaddaada caymis isla marka aad hesho bayaanka kharashka ee ugu horreya.
- Haddii hawl laguugu qabanayo sheybaarka, waxa laga yaabaa inaad tafaasiil kharash ka hesho sheybaarka gudbinta oo ku saabsan shaqada laga qabtay saambaladaada ama waxyaabaha namuunad ahaan lagaaga qaaday.
- Haddii bayobsi lagaa qaaday markii hawlgalka lagu jiray, waxa laga yaaba inaad bayaan kharash ka hesho fasiraadda baarista cudurka. Xarumahayaga qalliinka bukaan-socodka ayaa u isticmaala adeeggan Hospital Pathology Associates .

Bayaanka Daah-ka-Qaadka:

Haddii hawlgal caafimaad ay kaaga ballansantay mid ka mid ah Xarumaha Minnesota Gastroenterology, P.A. Endoscopy, daryeel-caafimaad bixiyahaaga ayaa kuu soo diraya goob ama adeeg u daryeel-caafimaad bixiyahaagu dano lacageed




ama dhaqaale ku leeyahay.

Dardaaranka Hormariska ah:

Dardaaranka Hormariska ah ayaan laga qadarin goobtan markaana haddii ay timaad xaalad dhacdo oo nafta halis galisa; tallabooyin taageero nolaansho ayaa la qaadi doonaa mar kasta, waxana qofka loo wareejin doonaa goob daryeel oo ka sii heer sarreeya.

Phone Number: 612-871-1145





Phone Number: 612-871-1145

